



Xisaabta kaydka ah

my **Bank**
Wherever you go

Iyada oo aan loo eegin inta dakhli ee ku soo gasha, had iyo goor waa caqli wanaagsan iyo lagama maarmaan in aad wax u kaydsato mustaqbalka, carruurtaada, waxbarashada, caafimaadka, iyo baahiyaha kale ee ku imaan kara adiga ama qoyskaaga. MyBank isaga oo ka jawaabaya baahiyahaas, ayuu macaamiisha u diyaariyay xisaabta Kayda.

Koontadan waxaa kale oo aad u adeegsan kartaa ujeedooyin maal-gashi iyo faa'iido aad ka samayso maal-gashigaaga.

MyBank, kuuguma haynayo lacagtaada kayd ahaan kaliya, laakiin waxa uu sidoo kale kuu kobcinayaa lacagtaada isaga oo kuugu daraya maalgashiyada bankigu sameeyo.

Faa'iidooyinka Akoonkan:

- Ma jirto lacag sanadle ah oo akoonkan laga qaado.
- Statement ga akoonkaaga oo si bille ah laguugu soo diro si otomatik ah.
- Si sahlan oo lacago lagaaga soo diri karo, isla markaana aad ugu dirsan karto dibedda, adiga oo adeegsanaya adeegga Swift, iyo kannaallada kale ee casriga ah ee lacagaha la isugu diro.
- Waxa aad si bilaash ah uga faa'iideysan kartaa warbixinnada dhaqaalaha dalka ee bankigu diyaariyo, iyo talooyinka ganacsi ee bankigu bixiyo.
- SMS lagugu soo wargelinayo dhamaan transactions-ka ka dhaca akoonkaaga.
- 24-ka saac iyo 7-da maalin ee sitimaanka oo aad si online ah ula sheekaysan karto shaqaalaha bankiga, si ay kaaga caawiyaan wixii cillada, cabasho ama su'aal ah ee aad qabto. Shaqaalaha bankiga waxa aad kula hadli kartaa website-ka bankiga, Facebook iyo WhatsApp.
- In aad adeegyada bankiga si sahlan uga heli karto wakiilladeena ku firirsan meelo badan oo dalka ah.
- In aad ka faa'iideysan karto maalgelinta bankiga.
- Waxa aad lacagtaada ku maal-gashan kartaa bankiga si aad faa'iido wanaagsan u hiigsato.

Shuruudaha Furista Acoonkan:

Shuruudaha laga rabo cidda akoonkan furanaysa waxa ay ku xiranyihiin nooca cidda furanaysa xisaabta, oo haddii uu yahay shaqsina waxaa laga rabaa shuruudaha laga doonayo qofka shaqsiga ah, haddii ay tahay shirkadna, waxaa laag rabaa shuruudaha akoon-furista shirkadaha.





 7777  +252 1 847777 | +252 62 3737777

 +252 61 3737777

 info@mybank.so

 www.mybank.so

  [MyBank.so](https://www.facebook.com/MyBank.so)

 [MyBankso](https://twitter.com/MyBankso)

Head Office / Branch Location
Mogadishu, Somalia

my